# TILMAANTA BUKAANKA SAWIRKA BAARISTA KLIINIKADA MANKATO

## ULTRASOUNDKA CALOOSHA [RUQ, Beerka, Soo Saaraha Unugyada Cas (spleen), Caloosha Kooban)]

| Abdomen Ultrasound (RUQ, Liver, Spleen, Limited Abdomen)-Somali |
|---|

Bukaanka: ______________________________________________________________

Taariikhda Ballanka: _______________ Waqtiga Imaashada: ___________________ am/pm

Goobta: Waaxda Sawirka Baarista Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Maxuu yahay Ultrasoundka Caloosha?

Ultrasoundka caloosha wuxuu isticmaalaa hirarka dhawaaqa, ma isticmaalo shucaaca, iyo qalab kale oo lagu magacaabo "transducer" si sawir looga qaado xubnaha ku jira gudaha caloosha.

### Baaristaada Ka Hor

- Sideed saac ka hor baarista, **HA** cunun hana cabbin waxba. Ha cabbin sigaar iyo ha calaajinin xanjo. Subaxnimada, waxaad qaadan kartaa dawooyinkaada iyo qiyaas yar oo biyo ah.
- In aad soo daahdid ama in aadan raacin tilmaamaha diyaarinta kore waxay dhalin doontaa in ballan kale loo qabto baarista.

### Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa dhici karto in lagu weydiiyo in aad iska dhigtid dharka. Waxaa lagu siin doonaa goono.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku seexatid sariir.
- Baaristaan waxay qaadan kartaa ilaa 60 daqiiqo si loo dhamaystiro.
- Waxaa caloosha lagaa marrin doonaa burcad diiran.
- Waxaa qalabka "transducer" la marmarin doonaa calooshaada korkeeda inta ay socoto baarista, waxaan dhici karto in cadaadis la saaro si loo hagaajiyo tayada sawirada.
- Qalabka wuxuu qaadi doonaa dhowr sawir, waxaaana lagu weydiin doonaa in aad ceshatid neefta marka la qaadaayo sawirada qaar.
- Sawiradaada waxaa fiirin doono, waxaana akhrin doono aqoonyaanka qalabka shucaaca.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbay baarista.

### Baarista Kaddib:

- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Waa la fiirin doonaa baaristaada, waxaana akhrin doono aqoonyaanka Raajada, 24ta saac xigta gudaheeda. Waxaa warbixin loo diri doonaa bixiyehaada si uu u fiiriyo. Bixiyehaada wuxuu mas'uul ka yahay in uu kuu soo gudbiyo natiijadaha, waxaana laguu soo diri doonaa warqad, telefoon, ama waxaa lagu siin doonaa ballan si laguula socdo. Haddii aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8570.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**